DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

## SOLICITOR GENERAL OFFICE

## مكتب المحامي العام للدولة

## WAAXDA FAAFINTA RASMIGA AH

# SHARCIGA HOWL-GABKA IYO LIIL TIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA PUNTLAND

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZAETTE

## الجريدة الرسمية

---

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Puntland, Address: Madaxtooyada Puntland, Garowe
Email:gg.pl@plstate.so

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 19AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 24/12/2019 | Lam. 08 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA HOWL-GABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA PUNTLAND

## TUSMADA

| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Xeerka Howl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**Sharci Lr. 9 ee December 24, 2019, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowaldda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland.**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/152/2019, kuna taariikhaysan 16/12/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qobo **Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee** Dowaldda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee** Dowaldda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3aad**

Dhaqan-gal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr. Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونت لاند الصومالية مكتب الرئيس
Office of the President
Puntland State of Somalia

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

*Tix:-*XGGW/DPL/152/2019 Garoowe, Isniin Taariikh:- 16/12/2019

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-**[aad].

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/194/2019 ee July 17 2019, kuna saabsan soo gudbin Xeerka Hawl-gabka Shaqaalaha Dawladda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Hawl-gabka iyo liiltirka Shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Dooddii iyo go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 45-aad fadhigiisii 19-aad ee 04/12/2019 Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Abwaan Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**GOLAHA WAKIILLADA**

**مجلس النواب**

# XEERKA HAWL-GABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA PUNTLAND.

---

**Garoowe, December / 2019**

## Tusmo


**Qodobka 1-aad** ....................4

**Erey-bixin** ....................4

**Qodobka 2-aad** ....................5

**Magaca, Ujeeddada iyo Baaxadda Xeerka** ....................5

**Qodobka 3-aad** ....................5

**Shaqo Ka Fariisad Da' Hawl-gab Awgeed** ....................5

**Qodobka 4-aad** ....................5

**Hubinta Da'da** ....................6

**Qodobka 5-aad** ....................6

**Saamaynta Xeerkan** ....................6

**Qodobka 6-aad** ....................6

**Nidaamka Bixinta Hawl-gabka** ....................6

**Qodobka 7-aad** ....................7

**Liiltirka iyo Nidaamka Lacag-bixintiisa** ....................7

**Qodobka 8-aad** ....................7

**Muddada Bilawga Hawl-gabka iyo Liiltirka** ....................7

**Qodobka 9-aad** ....................7

**Mutaysiga Hawl-gabka** ....................7

**Qodobka 10-aad** ....................8

**Shuruudaha Lagu Waayi Karo Hawl-gabka iyo Liiltirka** ....................8

**Qodobka 11-aad** ....................8

**Ka Ruqsaysasho Shaqo** ....................8

**Qodobka 12-aad** ....................8

**Maaliyadda Hawl-gabka** ....................8

**Qodobka 13-aad** ....................9

**Canshuur** ....................9

**Qodobka 14-aad** ....................9

**Hawl-gab Naafonimo** ....................9

Qodobka 15-aad....................................................................................................9

Horumarin Hawl-gab...............................................................................................9

Qodobka 16-aad....................................................................................................10

Qofka Shaqaalaha ah ee Shaqo Dawladeed Ku Geeriyooda..............................................10

Qodobka 17-aad ....................................................................................................10

Xannaanda Carruurta Waalidkood Dhintay......................................................................10

Qodobka 18-aad ....................................................................................................10

Geerida Caadiga ah ee Shaqaalaha aan Hawl-gabka Gaarin..............................................10

Qodobka 19-aad....................................................................................................10

Waayitaanka iyo Joojinta Hawl-gabka..........................................................................10

Qodobka 20-aad ....................................................................................................11

Oggolaanshaha iyo Bixinta Hawl-gabka iyo Liiltirka.........................................................11

Qodobka 21-aad....................................................................................................11

Hawl-gab iyo Liiltir aan La Wareejin Karin ....................................................................11

Qodobka 22-aad ....................................................................................................11

Habaynta Mushaharooyinka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah.................................11

Qodobka 23-aad ....................................................................................................12

Burin....................................................................................................................12

Qodobka 24-aad ....................................................................................................12

Dhaqan-gal ...........................................................................................................12

## Qodobka 1-aad
## Erey-bixin

**Warbixin cilmiyeed:** waxaa loola jeedaa daraasad ku saleysan xaaladaha dhaqaalaha iyo qaababka hawl-gabka iyo liiltirka .

**Aqoonsiga Da'ada**: Waxaa loola jeedaa caddayn ay bixisay hay'ad caafimaad, taas oo la xiriirta da'da dhabta ah ee qofka.

**Aqoonsiga naafonimo:** Waxaa loola jeedaa caddayn ay bixisay hay'ad caafimaad oo muujineysa heerka naafonimada qofka .

**Xuquuq:** waxaa loola jeedaa lacagta hawl-gabka iyo liiltirka la siinayo cidda qaanuun ahaan muteysatey.

**Carruur:** waxaa loola jeedaa, xeerkan guduhiisa, ilmaha hawl gabaha geeriyoodey oo da'diisu ka yar tahay 18 sano.

**Naafo:** waxaa loola jeedaa qof aan gudan karin waajibaadkiisa shaqo, jir, maskax, iyo jirro ahaan ama dhaawac culus oo soo gaarey dartiis.

**Hawl-gab soo hormaray**: waxaa loola jeedaa dhammaadka xiriirka shaqo ka hor muddadii hawl-gabka.

**Wasaarad:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ee Dawladda Puntland.

**Hawl-gab:** Waxaa loola jeedaa qofka shaqaalaha rasmiga ah ee dawladda oo gaarey da'da shaqo ka fariisadka ee ku xusan xeerkan.

**Liiltir:** Waxaa loola jeedaa nidaamka xaq-siinta ee lagula dhaqmo laguna sagootiyo shaqaalaha aan gaarin muddada Hawl-gabka, uuse dhammaaday xiriirkii shaqo ee kala dhexeeyey dawladda Puntland ama xubneheeda.

**Dhaxaltooyo:** Waxaa loola jeedaa dadka xaqa u leh xuquuqda qofka hawl-gabaha ah ee geeriyoodey.

**Mushahar:** Waxaa loola jeedaa mushahar bileedka asaasiga ah ee uu qaadanayo qofka shaqaalaha ahi oo aaney ku jirin gunnooyin, abaal-marin iyo lacag kasta oo ku soo gasha qaabab kale.

## Qodobka 2-aad
## Magaca, Ujeeddada iyo Baaxadda Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.
2. Ujeeddada xeerkan waxaa ka mid ah, in lagu dhoqo laguna xaq siiyo shaqaalaha rayidka ah ee mutaystay hawl-gabka iyo liiltirka.
3. Baaxadda xeerkani waxay ku baahsan tahay dhulka Puntland oo dhan.

## Qodobka 3-aad
## Shaqo Ka Fariisad Da' Hawl-gab Awgeed

1. Qofka shaqaalaha ahi waxa uu shaqada ka fariisanayaa;
   b- Marka uu gaaro 65 sano (Lixdan iyo shan) haddii uu rag yahay.
   t- Markey gaarto 60 sano( Lixdan) markay dumar tahay.
2. Mararka qaarkood qofka shaqaalaha ah waxaa loo oggolaan karaa inuu shaqada ka fariisto ka hor intuusan gaarin da'da kor ku xusan iyadoo la tix-gelinaayo jiritaanka duruufo gaar ahaaneed.
3. Haddii qofka shaqaalaha ah ee gaarey da'da shaqo ka fariisiga ee ku xusan farqada koowaad ee isla qodobkaan loo arko in shaqadiisii loo sii baahan yahay, waxay isaga iyo hay'adda uu ka tirsan yahay isla oggolaan karaan inuu shaqada ku-sii-jiro.
4. Hawl-gabuhu wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo lacagta hawl-gabnimada marka uu ka fariisto shaqada dawladda sida uu qabo xeerkani.

## Qodobka 4-aad
## Hubinta Da'da

1. Qof kasta oo la qoraayo shaqada dawladda Puntland, inta uusan hawl-gelin, waa inuu qoraal ahaan ku caddeeyaa waqtiga dhalashadiisa keenaana warqadda dhalashada ama dokumenti kale oo la aqoonsan yahay sugayana taariikhda uu dhashay.
2. Haddii shaki galo taariikhda uu dhashay qofka shaqaalaha ahi waxaa Wasaaradda caafimaadka ee dawladda Puntland u magacaabeysaa guddi takhaatiir ah oo baara kana soo talo-bixiya, ka dib marka ay hesho codsiga Wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo cayaaraha DPL.

## Qodobka 5-aad

## Saamaynta Xeerkan

1. Xeerka hawl-gabka iyo liiltirka waxaa lagu dhaqayaa shaqaalaha rayidka ah ee dawladda Puntland oo keliya, sida uu qabo qodobka 3-aad ee xeerka shaqaalaha rayidka ah (xeer-Lr.12).
2. Xeerkani ma saamaynayo;

   b- Xubnaha Golaha Wakiillada, Golaha Wasiirada iyo ciddii loo magacaabo shaqo siyaasadeed.

   t- Ciidamada qalabka sida iyo kuwa u qaabaysan hab ciidan.

   j- Shaqaalaha ka tirsan hay'adaha ganacsiga iyo Bangiyada ay dawladdu leedahay.

   X- Shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo kuwa heshiisleyda ah ee dawladda u shaqeeya waqti kooban oo aan ku imaan habka magacaabista shaqaalaha dawladda.

   kh- Xubnaha Garsoorka.

   d- Shaqaalaha ka shaqeeya shaqooyinka gaarka ah.

   r- Shaqaalaha dawladaha hoose.

## Qodobka 6-aad

## Nidaamka Bixinta Hawl-gabka

1. Hawl-gabka lacageed oo la siinayo shaqaalaha si xiriir ah ugu shaqeeyey dawladda muddo labaatan sano ah (20) ama in ka badan gaareyna da'da hawl-gabka waa sida soo socota:

   b- 65% mushahar bileedkiisa asaasiga ah hadduu shaqeeyey 20 sano (labaatan) iyo dheeri laakiin uusan gaarin 25 sano (labaatan iyo shan).

   t- 75% mushahar bileedkiisa asaasiga ah hadduu shaqeeyey 25 sano ( labaatan iyo shan) iyo ka badan laakiin uusan gaarin 30 sano (soddon).

   j- 85% mushahar bileedkiisa asaasiga ah hadduu shaqeeyey 30 sano (soddon) iyo ka badan.

2. Hawl-gabka ugu yar oo dawladda puntland siineyso bishii qofka shaqaalaha ah oo hawl-gabay waa $30 (soddon doolar) ama Shillin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 7-aad

## Liiltirka iyo Nidaamka Lacag-bixintiisa

1. Liiltir waa nidaam lagu dhaqo laguna sagootiyo shaqaalaha aan gaarin muddada hawl-gabka oo uu dhammaaday xiriirkii shaqo oo kala dhexeeyey dawladda Puntland ama xubnaheeda.
2. Shaqaalaha aan gaarin muddada hawl-gabka isla markaasna si joogto oo xiriir ah u soo hayey shaqada dawladda muddo 5 ilaa 19 sano ah (Shan ilaa toban iyo sagaal), waxay xaq u yeelanayaan lacag liiltir ah oo u dhiganta bil mushaharkeed sanad kasta oo ay shaqeeyeen ka dib marka uu dhammaado xiriirkooda shaqo oo kala dhexeeya hay'adda dawladeed oo ay u shaqeynayeen.

## Qodobka 8-aad

## Muddada Bilawga Hawl-gabka iyo Liiltirka

1. Muddada lagu mutaysanayo hawl-gabka ama liiltirka waxaa laga soo bilaabayaa 1-da Agoost 1998 ama taariikhda qofku shaqada joogtada ah bilaabay hadba tii dambeysey.
2. Hubinta hawl-gabka, habka bixintiisa iyo jaangoynta muddadiisa waxaa u xilsaaran guddi gaar ah oo ay xubnihiisa ka mid yihiin Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha, Bankiga dhexe iyo guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda Puntland.
3. Guddiga ku xusan faqrada labaad ee qodobkan waxay ku imaanayaan xilkooda waxana xeer ku magacaabaya Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 9-aad

## Mutaysiga Hawl-gabka

1. Sida uu qabo nidaamka guud ee xeerkan, hay'adaha dawladda xaq looguma yeelan karo wax ka badan hal hawl-gab.
2. Qofka shaqaalaha ah oo galay hawl-gab ma qaban karo shaqo dawladeed oo rasmi ah.
3. Haddii ay dhacdo in qof hawl-gab ahi, ka dib markii uu qaatay hawl-gabkiisa uu dib-u-bilaabo shaqo dawladeed, waxaa muddada shaqada dambe loo xisaabinayaa mid aan joogto ahayn, wuxuuna xaq u yeelanayaa liiltir u dhigma hadba muddada uu shaqeeyey.
4. Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawl-gab ay geeri ku timaado, dhaxaltooyadiisu waxay xaq u yeelan karaan hal hawl-gab oo keliya.

## Qodobka 10-aad

## Shuruudaha Lagu Waayi Karo Hawl-gabka iyo Liiltirka

1. Xaq uma laha hawl-gab ama liiltir qofka shaqaalaha ah oo shaqada looga eryey sababaha soo socda;
   b- Talaabo anshaxeed
   t- Xukun Maxkamadeed oo kama dambays ah oo aan ka yarayn 3 sano( saddex), haddii lagu xukumo dacwo ciqaab ah oo ka dhalatay shaqada rasmiga ah oo loo isticmaalay ka faa'iidaysasho aan sharci ahayn, xatooyo xoolo dadweyne, tuugo, khayaano iyo dembi kasta oo ka reebaya qofka shaqaalaha ah inuu qabto shaqo dawladeed.
2. Qofka shaqaalaha ah ee ku sugnaada xaaladda lagu xusay xarafka (b) ee faqrada koowaad ee isla qodobkan, waxaa la siinayaa lacagta looga goyn jirey hawl-gabka ama liiltirka.

## Qodobka 11-aad

## Ka Ruqsaysasho Shaqo

1) Qofka shaqaalaha ah oo iskii uga ruqsaysta shaqada dawladda lama siin karo hawl-gab hadduusan dhammeysan 20 sano (labaatan) oo shaqo dawladeed oo xiriir ah, hase yeeshee, waxaa la siin karaa liiltir hadduu shaqeeyey 5 sano (shan) ama ka badan oo xiriir ah iyadoo lagu siinayo hal bil mushaharkeeda asaasiga ah sanad kasta oo buuxa oo uu shaqeeyey.
2) Qofka shaqaalaha ah ee shaqeeyey muddo ka yar 5 sano (shan) isla markaasna si sharci ah loogu oggolaaday shaqo ka tegista wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo lacagtii looga goyn jirey hawl-gabka.

## Qodobka 12-aad

## Maaliyadda Hawl-gabka

1. Maaliyadda ku baxaysa hawl-gabka shaqaalaha dawladda waxaa habaynaysa Wasaaradda Maaliyadda.
2. Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda wuxuu ka bixinayaa boqolkiiba shan (5%) mushaharkiisa asaasiga ah si loogu biiriyo maaliyadda hawl-gabka.
3. Dawladdu waxay bil walba ku kordhineysaa maaliyadda hawl-gabka boqolkiiba shan (5%) mushaharka asaasiga ah ee qofka shaqaalaha dawladda ah.
4. Lacagtaas ku xusan faqradaha 2-aad iyo 3-aad ee isla qodobkan waxaa lagu haynayaa madax-xige u gaar ah ee miisaaniyadda dawladda lamana wareejin karo si kharaj kale loogu bixiyo.

## Qodobka 13-aad
## Canshuur

Wax canshuur ah lagama qaadayo lacagta hawl-gabka iyo liiltirka ay mutaysteen amase la siinayo shaqaalaha rasmiga ah oo uu dhammaaday xiriirkoodii shaqo oo ay la lahaayeen dawladda Puntland.

## Qodobka 14-aad
## Hawl-gab Naafonimo

Xuquuqdiisa liiltir ama hawl-gab ka sokow, qofka shaqada dawladda uga fariista dhaawac naafonimo oo shaqada dawladda ku soo gaarey isla markaasna guddi takhaatiir dawladeed soo qiimeeyeen xaddiga naafonimadiisa wuxuu yeelanayaa xuquuqda hoos ku qoran:

1. 15% mushaharkiisa asaasiga ah haddii naafaddu ka hooseyso 20% ama ay tahay naafo fudud.
2. 25% mushaarkiisa asaasiga ah haddii ay naafadu u dhexeyso 20% iyo 35% ama ay tahay naafo dhexe.
3. 100% mushaarkiisa asaasiga ah haddii naafadu ka sarreyso 35% ama ay tahay naafo culus.

## Qodobka 15-aad
## Horumarin Hawl-gab

Haddii qofka hawl-gabka ahi qoraal ku codsado horumarin hawl-gab, inta uusan shaqada ka fariisan, waxaa hormarin loo siin karaa 1/4 (afar meelood meel) hawl-gabka soo haray oo ah 3/4 ( afar meelood seddex) waxaa la siinayaa bil kasta dhammaadkeeda.

## Qodoka 16-aad

## Qofka Shaqaalaha ah ee Shaqo Dawladeed Ku Geeriyoodey

1. Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawl-gab welina shaqeynayey u geeryoodo dhaawac gaarey awgiis isagoo gudanaya hawlihii loo xil-saaray, waxaa la siinayaa dhaxaltooyadiisa deeq lacageed oo u dhiganta lix bilood mushaharkiisa asaasiga ah.
2. Haddii qofka shaqaalaha ah oo aan weli gaarin hawl-gabnimo u geeriyoodo dhaawac gaarey dartiis isagoo gudanaya hawlihii loo xil-saaray waxaa dadka dhaxalkiisa leh wax lagu siinayaa habka ku tilmaaman faqrada koowaad ee qodobkan.
3. Qofka shaqaalaha dawladda ah hadduu ku dhinto hawl-gal ciidan ama dagaal isagoo gudanaya hawl Puntland ama ka adeegaya goob dagaal oo daafacaya Puntland, waxaa lagu xaq siinayaa sida uu qabo xeerka hawl-gabka iyo liiltirka ee ciidammada qalabka sida.

## Qodobka 17-aad

## Xannaanada Carruurta Waalidkood Dhintay

1. Haddii qof shaqaalaha ah dhinto, waxay carruurtiisu xaq u yeelanayaan in bil walba la siiyo lacagtii uu hawl-gabnimada u qaadan jirey ilaa ilmaha ugu yari ka gaarayo 18 sano.
2. Qofka shaqaalaha ah ee mutaystay hawl-gab welina shaqeynayey hadday ku timaado geeri caadi ah waxaa carruurtiisa lagu dhaqayaa sida ku xusan faqrada koowaad ee qodobkan.

## Qodobka 18-aad

## Geerida Caadiga ah ee Shaqaalaha aan Hawl-gabka Gaarin

1. Haddii qof shaqaalaha ah oo aan hawl-gab xaq u lahayn u dhinto geeri caadi ah, dadka dhaxalkiisa lihi waxay xaq u leeyihiin lacag u dhiganta bil mushaharkeeda asaasiga ah sannad kasta oo uu shaqeeyey.
2. Waxay kaloo dawladdu siineysaa deeq lacageed oo u dhiganta hal bil mushaharkiisa caadiga ah.

## Qodobka 19-aad

## Waayitaanka iyo Joojinta Hawl-gabka

1. Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawl-gab ay maxkamadi ku xukunto ciqaab xarig ah isagoo shaqada dawladda ku jira kuna caddaadaan dembiyada ku xusan xarafka (T) ee qodobka 10-aad ee isla xeerkan wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawl-gabka.
2. Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawl-gab lagu xukumo dembiyo liddi ku ah dawladnimada Puntland amase qarannimada soomaaliyeed sida ku xusan qaybta 1-aad buugga labaad ee xeerka ciqaabta, ciqaabtiisuna keeni karto dil, xabsi daa'im ama xarig aan ka yareyn 10 sano (Toban), wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawl-gabka.

3. Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawl-gab, sida xeerkani qabo ama hawl-gabeed ah ay maxkamadi ku xukunto xarig uga yimid dembi ka duwan kuwa ku xusan faqrada 1-aad ee isla qodobkan, dembiyadaas oo keeni kari kara shaqo ka reebid muddeysan waxaa laga joojinayaa xaqa hawl-gabka muddada uu ku sugan yahay xaaladda shaqada ka reebeysa.

## Qodobka 20-aad
## Oggolaanshaha iyo Bixinta Hawl-gabka iyo Liiltirka

Marka xiriirka shaqada ee ka dhexeeya qofka shaqaalaha ah iyo hay'adda dawladeed, hawl-gabka ama liiltirka waxaa oggolaaneysa Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, dhalinyarada iyo Ciyaaraha, kaddib marka ay hesho talo-bixinta hay'adda uu u shaqeynayey qofka shaqaalaha ahi waxaana bixinaya Wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 21-aad
## Hawl-gab iyo Liiltir aan La Wareejin Karin

Hawl-gabka iyo liiltirka xeerkani xusayo laguma reebi karo cid kale lamana wareejin karo.
Hawl-gab ama liiltir maxkamaddu way joojin kartaa deyn ama waxyaalo kale oo dawladdu qofka ku leedahay awgeed.
Sidoo kale maxkamaddu waxay amar ku bixin kartaa joojinta hawl-gabka ama liiltirka si loogu gudo deyn qofku ka qabo dad gaar ah, taasoo waafaqsan xeerka madaniga ee dawladda Puntland.

## Qodobka 22-aad
## Habaynta Mushaharooyinka Asaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah

Mushaharooyinka asaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladda Puntland waxaa goyntooda u xil-saaran guddi gaar ah oo ay xubnihiisa ka mid yihiin Wasaaradda Maaliyadda, Bangiga Dhexe, Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, dhallinyarada iyo Ciyaaraha iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladda Puntland.

## Qodobka 23-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin xeerkan hawl-gabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladda Puntland.

## Qodobka 24-aad
## Dhaqan-gal

Xeerkani hawl-gabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda Puntland wuxuu dhaqan-gelayaa markuu Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.